

Wargadda Macluumaadka Wareejinta Hawlaha: Maajo 2026

Tan waxaa la socda warqadda ka timid Madaxa Fulinta ee Elim, Paul Smith, oo loo dirayo dhammaan macaamiisha Elim, taas oo lagu shaacinayo qorshaha la soo jeediyay ee Wareejinta Hawlaha ee u dhexeeya Elim iyo Places for People.

Waxaan rajaynaynaa in xaashidan macluumaadku ay kaa caawin doonto ka jawaabidda su'aalaha aad qabtid. Waxaan ku bixin doonnaa macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan isku darka bogga internetka ee Elim.

Waa ayo Kooxda Places for People?

Kooxda Places for People (PfP) waa shirkadda hormuudka ka ah UK ee ka shaqaysa adeegyada bulshada. PfP waxay u jirtaa inay nolosha dadka beddesho iyadoo abuuraysa oo taageeraysa Bulshooyin Kobcaya, Tani waxay ka mid tahay maaraynta guryo ammaan ah oo tayo wanaagsan, dhisidda guryo cusub oo ku yaal meelaha ku habboon, iyo ka caawinta bulshada iyo macaamiisha iyada oo la taageerayo waxbarashada, caafimaadka, fayo-qabka, shaqo helidda iyo ka mid noqoshada bulshada.

PfP waxay leedahay dhowr shirkado-hoosaad oo si rasmi ah uga Diiwaangashan Bixinta guryaha bulshada, waxaana nidaamiya oo kormeera Hay'adda Kormeerka Guryaynta Bulshada (RSH).

Booqo www.placesforpeople.co.uk si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Waa maxay Wareejinta Hawlaha?

Wareejinta Hawlaha waa hab sharci ah oo ay hal hay'ad guryaynta ah ugu wareejiso dhammaan hawlaha iyo adeegyadeeda hay'ad kale. Tani waxay ka dhigan tahay in dhammaan guryaha, mas'uuliyadaha, iyo ballanqaadyada – oo ay ku jiraan kuwa deggenyaasha – ay u wareegaan milkiilaha cusub ee guryaha. Marka laga eego dhinaca deggenaha, heshiiskaaga kiradaheshiiskaaga kirada ee muddada cayiman leh ama ruqsaddaada iyo xuquuqdaada waxay sii ahaanayaan kuwo la ilaaliyo, balse milkiilaha guryaynta ayaa isu beddeli doona bixiyaha cusub ee guryaha. Ururka wareejinaya hawlaha mar dambe ma sii jiri doono, wax walbana waxay noqonayaan qayb ka mid ah hay'adda guryaynta ee qaadaysa.

Wareejinta Hawlaha waa hab sharci ah oo ay nidaamiso Hay'adda Maaliyadda ee UK (FCA), sidoo kalena ay kormeerto Hay'adda Nidaamisa Guryaynta Bulshada. Tani waxay xaqiijisaa in habkan loo fuliyo si sax ah oo waafaqsan sharciga, isla markaana uu waafaqsan yahay danta ugu wanaagsan ee deggenyaasha.

Ma saameyn doonaa heshiiskayga kirada, ruqsadayda ama heshiiskayga kirada ee muddada cayiman leh?

Maya, shuruudaha heshiiskaaga kirada, ruqsadda ama heshiiskaaga kirada muddada cayiman leh sinaba isuma beddeli doonaan sababo la xiriira wareejinta hawlaha. Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga ku xusan heshiiska kirada/heshiiskaga kirada muddada cayiman leh waxay ahaan doonaan sidii hore, wax isbeddel ahna kuma iman doonaan.

Ma kordhi doontaa kiradaada sababo la xiriira isbeddelladan suurtagalka ah?

Maya, kirada ay qaadaan dhammaan Bixiyeyaasha guryaha ee Diiwaangashan waxaa xukuma sharciga iyo nidaam uu dejiyo dawladda dhexe iyo Hay'adda Nidaamisa Guryaynaa Bulshada. Isbeddelka kiradaada mar walba wuxuu u dhacayaa si waafaqsan nidaamkan, isagoo la jaanqaadaya shuruudaha iyo siyaasadaha dawladda.

Ma kordhi doonaan kharashaadka adeegyada sababo la xiriira isbeddelladan suurtagalka ah?

Maya, kharashaadka adeegyada ma kordhi doonaan sababo la xiriira wareejinta hawlaha. Kharashaadka adeegyada waxay ku salaysan yihiin kharashka la qiyaasay ee lagu bixiyo adeegyada, waxaana dib loo eego mar kasta

sannad walba, sidaas darteedna way kordhi karaan ama hoos u dhici karaan, iyadoo ku xiran kharashaadkaas. Isbeddel kasta oo ku yimaada adeegyada ama kharashaadka waxaa mar walba lagula wadaagi doonaa si cad oo rasmi ah.

Guryaha badankood, kharashaadka adeegyada ee muddada 1-da Abriil 2026 ilaa 31-da Maarso 2027 waxaa xisaabiyay Elim, waxaana lagula wadaagay Febraayo 2026. Kharashaadka laga bilaabo Abriil 2027 iyo wixii ka dambeeya, Places for People ayaa mas'uul ka noqon doonta dib u eegista iyo kuu gudbinta kharashaadka adeegyadaaga.

Ma qasbanaan doontaa inaan guuro?

Maya, qasab kuguma ahaan doonto inaad guurto. Wareejinta Hawlaha saameyn kuma yeelan doonto xaqaaga aad ugu sii noolaan karto gurigaaga hadda, sidoo kalena ma saameyn doonto amnigaaga heshiiska kirada.

Ma u baahan doonaa inaan beddelo Amarka Joogtada ah ama Lacag Bixinta Tooska ah ee aan siiyo Elim?

Haddii Wareejinta Hawlaha ay hirgasho, waxaad lacag-bixinnada u diri doontaa Places for People Living+ Limited halkii aad ka siin lahayd Elim Housing Association Limited. Waxaan isbeddelkan ka dhigi doonaa mid kuu fudud sida ugu macquulsan, waxaanan ku ogeysiin doonaa wixii isbeddel ah ee aad u baahan tahay inaad ku sameyso Amarrada Joogtada ah ama hababka kale ee lacag bixinta.

Haddii aad ku bixiso Lacag Bixinta Tooska ah, lacag bixintaada si toos ah ayaa loo wareejin karaa adigoon waxba samayn. Haddii aad rabto inaad dejiso Lacag Bixinta Tooska ah, fadlan la xiriir Elim.

Ma saameyn doontaa isku darka Faa'iidooyinkayga ama Xuquuqdayda?

Maya, wareejinta hawlaha wax saameyn ah kuma yeelan doonto Faa'iidooyinka ama Xuquuqaha aad hadda hesho.

Lacag bixin kasta oo toos ah oo Faa'idadda Guriyeynta ama Kaalmada guud ee dakhliga ah waxaa loo baahan doonaa in lagu bixiyo Places for People Living+ Limited halkii laga siin lahaa Elim Housing Association Limited, waxaanan ka dhigi doonaa isbeddelkan mid sida ugu fudud ee suurtagalka ah kuugu noqda.

Ma yeelan doonaa isla Sarkaalka Guryaynta ama Shaqaalaha Taageerada ee aan hadda haysto?

Deggeneyaasha ku nool guryaynta taageerada, waxaan filaynaa in kooxda taageeradaadu ay ahaan doonto sidii hore. Haddii mustaqbalka wax isbeddel ahi yimaadaan, waan ku ogeysiin doonaa.

Haddii aad ku nooshahay guri wada-lahaansho ama guri kiraysi guud oo ay maamusho PfP, waxaad yeelan doontaa Maareeye Guryaynta Bulshada oo ku taageeri doona kadib Wareejinta Hawlaha ee la soo jeediyay. Tani waxay noqon kartaa isla qofka hadda kaa caawiya maaraynta gurigaaga, ama qof cusub. Haddii aad leedahay Maareeye Guryaynta Bulsho oo cusub, wuu isbaran doonaa oo wuu ku soo bandhigi doonaa naftiisa, sidoo kalena wuxuu heli doonaa dhammaan macluumaadka uu u baahan yahay si uu kula shaqeeyo.

Haddii aad hore u leedahay wakiil maareeya, waxay u badan tahay inuu sii wadi doono shaqadiisa; haddii mustaqbalka aad yeelato wakiil maareeya, waan ku ogeysiin doonaa.

Maxaa ku dhici doona shaqaalaha Elim?

Dhammaan shaqaalaha Elim waxaa loo soo bandhigi doonaa shaqo gudaha PfP ahaan qayb ka mid ah Wareejinta Hawlaha ee la soo jeediyay. Inta badan xaaladaha, wax isbeddel ah kuma iman doono shaqooyinkooda ka hor taariikhda la beegsanayo ee wareejinta 5 Oktoobar, waxayna sii joogi doonaan shaqooyinkooda hadda ilaa waqtigaas, iyadoo sidoo kale Guddiga iyo kooxda hoggaanka ay sidaan oo kale sii wadi doonaan. Tani waxay xaqiijin doontaa in wareejinta u dhexeysa Elim iyo PfP ay si habsami leh u dhacdo.

Ma la isticmaali doonaa isla qandaraasleyaasha si ay u fuliyaan adeegyada dayactirka ee mustaqbalka?

PfP waxay leeyihiin shaqaale u gaar ah oo dayactir iyo sidoo kale qandaraasleyaal badan oo loo adeegsan doono si loo bixiyo inta badan adeegyada dayactirka mustaqbalka ee guryaha Elim ee hadda jira. PfP sidoo kale waxay la shaqayn doontaa alaab-qeybiyeyaasha iyo qandaraasleyaasha Elim ee hadda jira, halkaas oo horey u jiro heshiis shaqeynaya. Mustaqbalka, qaar ka mid ah qandaraasleyaasha Elim waxay heli doonaan fursad ay ugu biiraan nidaamka qandaraasleyaasha kooxda PfP. Tani waxay ka dhigan tahay inay sii wadi karaan ka shaqaynta guryaha Elim ee hadda jira iyo sidoo kale guryaha kale ee ay leedahay PfP.

Waxaa la ii qorsheeyay in gurigayga lagu sameeyo dayactir ama horumar; ma sii socon doonaan?

Haa, haddii aan horey u xaqiijinay inaan gurigaaga ka fulin doonno dayactir qorshaysan ama horumarin, Wareejinta Hawlaha wax saameyn ah kuma yeelan doonto arrintaas. Mararka dhifka ah

waxaa laga yaabaa inaan dib u dhigno shaqada gurigaaga sababo kale awgood, balse waan ku ogeysiin doonnaa haddii ay taasi dhacdo.

Maxaa ku dhici doona macluumaadkayga gaarka ah?

Macluumaadka ay hayso Elim waxaa si ammaan ah loogu wareejin doonnaa nidaamyada PfP. Siyaasad cusub oo Asturnaanta ah ayaa lagu dabaqi doonnaa ururinta, isticmaalka iyo ilaalinta xogtaada gaarka ah. Waxay muujinaysaa in macluumaadkaaga gaarka ah uu hayn doono PfP halkii uu ka ahaan lahaa Ururka Guryaynta Elim.

Maxaa dhacaya haddii Wareejinta Hawlaha ee la soo jeediyay aysan dhicin?

Go'aan kama dambays ah ayaa la gaari doonnaa marka aan dhamaystirno la shigan aan la leenahay macaamiisheena. Kadib, Guddiyada Elim iyo PfP waxay tixgelin doonaan natiijada ka soo baxda la tashiga. Haddii aanan hore loo sii wadin Wareejinta Hawlaha, waxaad sii ahaan doontaa kirayste, qof haysta heshiiska kirada muddada cayiman leh ama ruqsad hayste Elim, iyadoo Elim ay sii ahaan doonto shirkad-hoosaad ka tirsan PfP. Si kastaba ha ahaatee, mar walba waxaan qorsheynaynay in labada urur ay dhammaystiraan Wareejinta Hawlaha oo ay si buuxda u midoobaan. Waxaan aaminsanahay in tani ay tahay habka ugu waxtarka badan ee lagu mideyn karo labada urur, isla markaana leh faa'iidada ugu badan ee macaamiisha Elim ee hadda jira.

Ma jiraan wax khasaare ah oo ku jira soo jeedinta?

Muddo aad u gaaban gudaheed, waxaan aqoonsannahay in Wareejinta Hawlaha ay keeni karto carqalad ama hubanti la'aan qaar ka mid ah macaamiisha Elim. Sida Ururka yar oo Guryaynta ah, macaamiil badan waxay Elim-ka shaqaalaheeda ku yaqaannaan magac ahaan, waxaan ognahay in qaar ka mid ah macaamiishu ay qiimeeyaan aqoonta taariikhiga ah iyo is-aqoonsiga ee soo kobcay waqti dheer gudihis. Waxaan ognahay in qaar ka mid ah macaamiisha ay ku adkaan karto inay la qabsadaan shaqaale cusub ama nidaamyada xiriir oo cusub, balse waxaan ka go'an inaan la shaqayno PfP si aan uga dhigno is baddelka mid sida ugu fudud ee suurtagalka ah ugu dhaca dhammaan macaamiisheena.

Waan ka xunahay inaan macasalaameyno magaca "Guryaynta Elim", inkastoo aan ku faraxsanahay in taariikhdeena iyo wax-qabadkeenu ay sii ahaan doonaan qayb ka mid ah taariikhda PfP.

Guud ahaan, waxaan u aragnaa in Wareejinta Hawlaha ee la soo jeediyay ay tahay mid danta ugu wanaagsan u ah deggenyaashayada. Ururka cusub ee la isku daray wuxuu si ka wanaagsan u awoodi doonnaa inuu u adkaysto cadaadiska dhaqaale ee dibadda, isla markaana waqti ka dib uu gaaro faa'iidooyinka aan dhammaanteen dooneyno inaan u aragno deggenyaashayada iyo bulshada ballaaran.

Sidee ayay adeegyadu isu beddeli doonaan ka dib Wareejinta Hawlaha?

Waxaad sii wadi doontaa inaad ka hesho PfP ugu yaraan isla nooca iyo baaxadda adeegyada guryaynta, taageerada iyo dayactirka ee aad hadda hesho. Si kastaba ha ahaatee, sida aad u heli doonto ama u isticmaali doonto qaar ka mid ah adeegyadaas way is beddeli doontaa sababo la xiriira Wareejinta Hawlaha ee la soo jeediyay iyo

qaabka PfP u bixiso adeegyada. Waxa kale oo jiri doona adeegyo cusub oo aad heli doonto adigoo ah Macmiil PfP ah, kuwaas oo Elim aanay hadda bixin.

Halkan waxaa ku jira qaar ka mid ah isbeddellada muhiimka ah ee adeegyada ee ka dhalan lahaa Wareejinta Hawlaha.

Aagga adeegga ama hawsha.	Sidee PfP u bixin doontaa adeegyada kadib taariikhda la soo jeediyay ee 5 Oktoobar 2026 ee Wareejinta Hawlaha.
<p>Xiriirka macaamiisha: sida aad ula xiriirto mulkiilaha gurigaaga sabab kasta ha ahaatee.</p>	<p>Waxaad awoodi doontaa inaad la xiriirto Xarunta Xiriirka Macaamiisha ee PfP adigoo isticmaalaya telefoon iyo sidoo kale khadka tooska ah.</p> <p>Khadadka waxay furan yihiin 24 saac maalintii marka ay jiraan dayactir degdeg ah, iyo 8 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Isniin ilaa Jimco wixii kale ee adeeg ah. Tani waxay ka dhigan tahay inaad heli doonto fursado badan oo aad kula xiriiri karto mulkiilaha gurigaaga kadib Wareejinta Hawlaha.</p> <p>Lambarka telefoonka iyo bogga internetka aad isticmaasho way is beddeli doonaan. Waxaan kuu soo diri doonnaa faahfaahinta arrimahan ka hor inta aan Wareejinta Hawlaha dhicin.</p> <p>PfP ma isticmaasho WhatsApp si ay ula xiriirto macaamiisha.</p>
<p>Adeegyada dayactirka iyo hagaajinta.</p>	<p>PfP waxay bixin doontaa adeegyada dayactirka joogtada ah iyo kuwa degdegga ah. Waxaad awoodi doontaa inaad ku soo sheegto dhammaan dayactirrada caadiga ah PfP adigoo adeegsanaya telefoon, khadka tooska ama adigoo fool-ka-fool ah ula hadlaya shaqaale PfP ah.</p> <p>Dayactirka degdegga ah waa in lagu soo wargeliyaa telefoon.</p> <p>PfP waxay dayactirradaada ku fulin doontaa mid ka mid ah shaqaalaha ama mid ka mid ah qandaraasleyaasha ay ansixisay. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mas'uuliyadaha dayactirka ee Macaamiisha iyo PfP, dayactirka caadiga ah iyo dayactirka degdegga ah waxaad ka heli kartaa internetka adigoo booqanaya placesforpeople.co.uk</p> <p>PfP waxay ka jawaabi doontaa dayactirka degdegga ah waxayna ka dhigi doontaa mid ammaan ah 24 saac gudahood.</p>

	<p>Dayactirka joogtada ah waxaa lagu soo qaban doonaa 60 maalmood gudahood.</p> <p>PfP kama qaado lacag macaamiisha marka ballamo la seego.</p>
Caafimaadka iyo Badbaadada Guriga	Caafimaadka iyo badbaadada waxaa ilaalin doona kooxaha PfP, waxayna sii wadi doonaan inay kaa caawiyaan adiga iyo deriskaaga inaad ahaataan kuwo ammaan ah. PfP waxaa looga baahan doonaa inay buuxiso isla heerarka u hoggaansanaanta ee ay hadda bixiso Elim.
Kormeerka guryaha ama xaafadaha	Kormeerka guryaha iyo xaafadaha waxaa fulin doona kooxaha PfP, oo ay ku jiraan Maareeyeyaasha Guryaynta Bulshada iyo Maareeyeyaasha Adeegyada.
Adeegyada wadajirka ah (adeegyada nadaafadda iyo beerta)	Waxaa laga yaabaa inuu isbeddel ku yimaado qandaraaslaha kadib Wareejinta Hawlaha. Haddii taasi dhacdo, waan ku ogeysiin doonaa. Nadiifinta iyo beerta waxaa fulin doona kooxaha Maamulka guryaha ee PfP ama qandaraasleyaal ay PfP ansixisay.
Helitaanka qalabyo is-adeegsi: portal-ka macaamiisha ee khadka tooska ah.	<p>Waxaad awoodi doontaa inaad iska diiwaangeliso portal-ka macaamiisha ee khadka tooska ah ee PfP, halkaas oo aad ku maamuli karto gurigaaga internetka, oo ay ku jiraan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Maareynta heshiiskaaga kirada ama heshiiska kirada muddada cayiman leh • Hubinta hadhaaga iyo bayaannada • Lacag bixinta • Soo sheegidda dhibaato ama dayactir • Codsashada wax-ka-beddel gurigaaga ah ama oggolaansho xayawaan cusub <p>Elim hadda ma siiso macaamiisheeda ikhtiyaar is-adeegsi khadka tooska ah.</p>
Heshiiska kirada iyo Heshiisyada kirada muddada cayiman leh	Ma jiri doonaan wax isbeddel ah oo ku yimaada shuruudaha iyo xeerarka heshiiskaaga kirada, ruqsadda, ama heshiiskaaga kirada muddada cayiman leh.
Dejinta kirada	Kiradaada isma beddeli doonto sababo la xiriira Wareejinta Hawlaha. Kiradaada waxaa dib loo eegi doonaa iyadoo la raacayo siyaasadda dib-u-eegista kirada ee ay dejisay Dowladda.
Dejinta kharashka adeegyada	<p>Kharashaadka adeegyadaada waxaa dib u eegi doona oo dejin doona PfP laga bilaabo Abriil 2027 iyo wixii ka dambeeya.</p> <p>Kharashaadka adeegyada waxaa dib loo eegi doonaa sanad walba, waxaana lagu saleeyaa kharashka la qiyaasay ee ku baxa bixinta adeegyada</p>

	<p>dhismahaaga iyo bulshadaada. Tani waxay ka dhigan tahay inay kor u kici karaan ama hoos u dhici karaan, iyadoo ku xiran isbeddellada ku yimaada kharashaadka ama adeegyada aad hesho.</p> <p>Haddii aad tahay milkiile guri oo leh kharash adeeg oo isbeddela, sidoo kale waxaad heli doontaa dib-u-heshiisiin sanadle ah.</p>
<p>Bixinta kiradaada iyo kharashka adeegyada</p>	<p>Waxaad awoodi doontaa inaad kiradaada iyo kharashaadka adeegyada ku bixiso:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Lacag Bixin Toos ah • Amar Lacag Bixin Joogto ah • Khadka tooska ah iyada oo loo marayo Portal-ka Macaamiisha • Lacag bixin telefoon oo otomaatigga ah <p>Tani waxay ka dhigan tahay in Wareejinta Hawlaha ay ku siin doonto habab cusub oo aad lacag ku bixiso.</p> <p>Haddii aad lacag ku bixiso khadka tooska ah ee AllPay ama telefoon, waxaad sii wadi doontaa inaad sidaas sameyso, inkastoo PfP aysan bixin doonin kaarar cusub oo AllPay ah oo lagu bixiyo goobaha lacag bixinta., waxaad weli isticmaali kartaa kaarkaagii hore ee jira. Haddii isbeddeladdan ay kaa caawin doonnaan inaad doorato hab cusub oo lacag bixin ah.</p>
<p>Lahaanshaha guri</p>	<p>Haddii aad tahay milkiile guri Elim ah ama qof leh lahaansho wadaag, waxaad heli doontaa adeegyo gaar ah kadib Wareejinta Hawlaha, oo ay ku jiraan koox aad weydiin karto su'aalo ku saabsan maaraynta gurigaaga ama heshiiskaaga kirada muddada cayiman leh. Qaar ka mid ah milkiileyaasha guryaha ama dadka leh lahaanshaha wadaagga waxaa laga yaabaa in guryahooda ay maamulaan RMG ama Halbeegga. Waxaan ku ogeysiin doonnaa marka aan u sii dhowaano waqtiga haddii tani ay kugu quseyso adiga.</p> <p>Waxaad awoodi doontaa inaad isticmaasho Farsamada khadka tooska ah ee Lahaanshaha Guriga ee PFP si aad u hesho macluumaad iyo inaad ku maamusho gurigaaga.</p> <p>Caymis kasta oo gurigaaga ah oo ay bixiso Elim waxaa loo wareejin doonaa heshiis caymis oo PFP ah. Tani waxay ka dhigan tahay in kharashaadka caymiska ay is beddeli karaan laga bilaabo taariikhda wareejinta hawlaha.</p>

<p>Cabashooyinka</p>	<p>Waxaad awood u yeelan doontaa inaad cabasho u gudbiso PfP haddii aad u baahato waxaana lagaa jawaabi doonaa si waafaqsan Xeerka Maareynta Cabashada Dhexdhexaadiyaha Guryaynta 2024. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrintan waxaad ka heli kartaa internetka adigoo booqanay placesforpeople.co.uk</p>
<p>Soo sheegidda iyo wax ka qabashada dabeecadda lidka ku ah bulshada</p>	<p>Waxaad awoodi doontaa inaad ku soo sheegto dabeecadda lidka ku ah bulshada adigoo adeegsanaya telefoon, khadka tooska ah ama si fool-ka-fool ah. PfP waxay leedahay Maareeyayaal Amniga Bulshada oo taageera kooxaha bulshada marka ay jiraan kiisaska adag.</p>
<p>Ka-qaybgalka macaamiisha</p>	<p>PfP waxay bixisaa fursado ka-qaybgal macaamiil oo ka ballaaran kuwa ay Elim bixiso. PfP waxay leedahay Koox Qaran oo Macaamiil iyo Koox Macaamiil oo Goboleed kuwaas oo aad codsan karto inaad ka mid noqoto. Waxa kale oo aad isku qori kartaa inaad xubin ka noqoto Qolka Dhegeysiga ee PfP halkaas oo aad kula wadaagi karto jawaab-celintaada iyo fikradahaaga khadka tooska ah.</p>
<p>Taageerada Macaamiisha</p>	<p>Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Xiriirka Macaamiisha ee PfP ama Maareeyaha Guryeynta Bulshada/Maareeyaha Adeegga si aad u hesho taageero ku saabsan maaraynta heshiiskaaga kirada haddii loo baahdo. Taageerada kirada waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Talo ku saabsan lacagta • Talo ku saabsan faaiidadda • Talo ku saabsan tamarta • Caawinta alaabta guriga • Awood-siinta dhijitaalka • Shaqo helis, xirfado iyo tababar • Bad qabka
<p>Hindisayaasha bulshada, fursadaha shaqo (employment) iyo fursadaha tababar.</p>	<p>Bulshadeena waxay heli doontaa fursado badan iyada oo loo marayo:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Maalgashiga bulshada ee ururrada iskaa wax u qabso iyo kuwa bulshada ee taageera macaamiisha • Isku xireyaasha bulshada oo horumariya iskaashiyada deegaanka • Xiriirrada lala yeesho alaab-qeybiyayaasha PfP oo bixiya tababar, shaqo, taageero iyo maalgelin loogu talagalay hindisayaasha bulshada • Codsiyada maalgelinta dhinaca saddexaad ama la shaqaynta ururro kale oo wadajir ah.
<p>Adeegyada Guryaynta La Taageero</p>	<p>Haddii aad ku nooshahay hoyi guryaynta la taageero, ma jiri doono wax isbeddel ah oo ku</p>

	yimaada taageerada aad hesho sababo la xiriira Wareejinta Hawlaha.
Adeegyada Guryeynta ee Gypsy-da iyo Socotada	Haddii aad ku nooshahay goob Gypsy-da iyo Socotada, ma jiri doono wax isbeddel ah oo ku yimaada adeegga aad hesho sababo la xiriira Wareejinta Hawlaha. Waxaa wali jiri doona Saraakiil Guryaynta oo takhasus leh oo u heellan maamulka goobtaada, PfP-na waxay sii wadi doontaa bixinta adeegyo tayo wanaagsan leh oo dhinaca guriyeynta iyo dayactirka ah bulshadaada.